

# ERAYADA DIIWAANGELINTA



Meel kasta oo ardaygaagu ka raadinayo kulliyad, waxaa muhiim ah in la xasuusto erayada soo socda. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan kala xiriir Xafiiska Diiwaangelinta ee U of M telefoonka 612-625-2008 ama 1-800-752-1000, ama la xiriir mid ka mid ah talo-bixiyeyaashayada diiwaangelinta barta [z.umn.edu/counselor](http://z.umn.edu/counselor). Wuxaan ku faraxsanahay inaan kuu sharaxno erayada oo aan adiga iyo ardaygaaga idin ka taageerno raadinta kulliyada.

## ERAYADA MUHIIMKA AH

ENGLISH TERM	FASIRAADA EREYGA	QEEXITAANKA
<b>Academic Factors</b>	<b>Arrimaha Tacliinta</b>	Taariikhda waxbarasho ee ardayga ee ay isticmaasho Jaamacadda Minnesota si ay dib-u-eegis ugu sameyso arjiga ardayga oo go'aan uga gaarto inuu tacliin ahaan diyaar u yahay inuu ku guuleysto fasallada heerka jaamacadeed
<b>Admission</b>	<b>Diiwaangelin</b>	Jawaabta kulliyada ee ku socoto codsadaha si loogu oggolaado inuu noqdo arday ka mid ah kulliyadooda
<b>Admissions Counselor</b>	<b>Talo-bixiyaha Diiwaangelinta</b>	Xubin shaqaale ka ah kulliyad oo taageera ardayda inta lagu gudojiro safarkooda raadinta kulliyad
<b>Admission Decision</b>	<b>Go'aan Diiwaangelin</b>	Xulasho kulliyadu sameyso marka ay siinayso arday diiwaangelin
<b>Admit</b>	<b>Diiwaangeli</b>	Kulliyad ayaa dib-u-eegis ku sameysay arjiga ardayga waxayna oggolaatay inuu diyaar u yahay inuu ku guuleysto dugsigooda waxayna siisay fursad uu ku dhigto
<b>Advisor</b>	<b>La-taliyaha</b>	Xubin ka tirsan shaqaalaha jaamacadda oo ka caawiya ardayda inay doortaan shaqada koorsada iyo horumarka dhanka qalinjabinta
<b>Application</b>	<b>Arji</b>	Foomka iyo dukumiintiyada ardaygu siiyo kulliyada si loogu tixgeliyo diiwaangelin
<b>Apply</b>	<b>Codso</b>	Ficilka gudbinta arjiga
<b>Best Fit</b>	<b>Ku Habboon</b>	Kalmad loo isticmaalio in lagu sharraxo dugsiga ku habboon danaha iyo hadafyada ardayga
<b>College Life</b>	<b>Nolosha Kulliyada</b>	Mahadhooyinka iyo fursadaha ay ardaydu heli doonaan arday ahaan
<b>College Search/Journey</b>	<b>Raadinta/Safarka Kulliyada</b>	Tallaabooyinka ardaygu qaado si uu u ogaado oo u helo kulliyadaha uu xiiseynayo
<b>Commuter</b>	<b>Socdaale</b>	Ardayga aan ku noolayn dhismaha jaamacadda isla markaana u lugeeyaa, u raaca baaskiil, gaadiidka dadweynaha ama gaari uu wato u qaato dhismaha kulliyada si uu u dhigto fasallada
<b>Confirmation Fee</b>	<b>Khidmadda Xaqijinta</b>	Lacag ardaygu bixiyo si loo xaqijiyo isqoristiisa
<b>Confirm Enrollment</b>	<b>Xaqiji Isqorista</b>	Tallaabo ardaygu qaado si uu dugsiga ugu wargeliyo inuu dhigan doono. Tallaabaden waxaa ka mid ah bixinta khidmada xaqijinta ee aan celinta-lacageed laheyn.
<b>Context Factors</b>	<b>Arrimaha Guud</b>	Macluumaadka shaqsieed ee ardayga ee ay adeegsato Jaamacadda Minnesota si ay dib-u-eegis ugu sameyso arjiga ardayga. Arrimahaan waxay lahaan karaan mawduucyo kala duwan sida naadiyada dugsiga kadib, isboortiga, mas'uuliyadaha qoyska, waayo-aragnimada shaqo, tabbarucaada iyo in kale oo badan.
<b>Cost of Attendance</b>	<b>Kharashka Dhigashada</b>	Kharashka guud ee dhigashada kulliyada, oo ay ku jiraan hoyga, buugaagta, gaadiid-raaca, khidmadaha, iyo kharashaadka kale ee ardaygu inta badan galoo markuu dhiganayo dugsiga
<b>Coursework</b>	<b>Shaqada koorsada</b>	Casharrada ardaygu dhigto si loo buuxiyo shuruud
<b>Defer</b>	<b>Dib-u-dhig</b>	Jawaabta kulliyadda siiso codsadaha tallaabada hore ee aan wali la diiwaangelini iyadoo ugu wacan tahay in macluumaad dheeraad ah loo baahan yahay
<b>Deny</b>	<b>Diid</b>	Kulliyad ayaa dib-u-eegis ku sameysay arjiga ardayga waxayna go'aansatay inaysan diiwaangelin
<b>Early Action Deadlines</b>	<b>Waqtiyada Kamadambeysta ah ee Tallabooyinka Hore</b>	Waqtiya kamadambeysta ah ee ugu horeeyaa ee arjiyada ee u oggolaanaya ardayda inay helaan go'aanka hore ee diiwaangelinta. U of M waxay leedahay laba ah waqtiyada kamadambeysta ah ee Tallabooyinka Hore. Go'aankan ma ku qabanayo.
<b>FAFSA</b>	<b>FAFSA</b>	Magaca la soo gaabiyay ee Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Dawladda ee Ardayga, oo ah foomka dawladda ee xisaabiya inta ardaygu awoodi karo inuu ku bixiyo kulliyada. Xisaabintan waxaa isticmaasha Jaamacadda Minnesota si ay u bixiso abaalmarinta kaalmada dhaqaale.

## ERAYADA MUHIIMKA AH

ENGLISH TERM	FASIRAADAA EREYGA	QEEXITAANKA
<b>Financial Aid</b>	<b>Gargaar Dhaqaale</b>	Lacag ah qaab deyn, deeq, deeq waxbarasho, iyo daraasad shaqo oo la bixiyo si gacan looga geysto bixinta lacagta kulliyada
<b>Financial Aid Package</b>	<b>Xirmada Kaalmada Maaliyadeed</b>	Caddada guud ee lacagta ardaygu helo si looga caawiyo inuu iska bixiyo kulliyada. Tani waxaa ka mid ah lacagta laga helo FAFSA, oo ay u bixiso jaamacadda, qaab deeq waxbarasho iyo daraasad shaqo ahaan.
<b>Freshman</b>	<b>Arday Cusub</b>	Arday ku jira sannadka koowaad ee kulliyada
<b>Golden Gopher</b>	<b>Golden Gopher</b>	Naaneys loogu talagalay ardayda dhigata Jaamacadda Minnesota Twin Cities, oo loogu magacdaray doobirkha dugsiga, Goldy Gopher
<b>Holistic Review</b>	<b>Dib-u-eegis Dhameystiran</b>	Nidaamka ay u isticmaasho Jaamacadda Minnesota inay ku eegto khibradaha tacliimeed iyo shaqsiyed ee uu ardaygu ku wadaago codsigiisa
<b>Housing Application</b>	<b>Arji Hoy</b>	Tallaabooyinka ardaygu qaado si uu ugu noolaado hoolalka la deggo ee dhismaha jaamacadda. Codsigan wuu ka duwan yahay arjiga diiwaangelinta.
<b>Living Learning Communities</b>	<b>Bulshooyinka Ku Jira Nolosha Waxbarasho</b>	Qabanqaabooyinka hoy ee U of M halkaasoo ardayda leh asal iyo dano isku mid ah ay ku wada noolaadaan meel u dhow hoolalka la deggo
<b>Majors</b>	<b>Takhasusyada Gaarka ah</b>	Halka diirada gaarka ah ardaygu ka saarayo waxbarashada. Takhasuska gaarka ah waa waajib ah si loo qalinjabinyo.
<b>Minors</b>	<b>Takhasusyada Labaad</b>	Halka labaad ee diirada gaarka ah ardaygu ka saarayo waxbarashada. Takhasuska labaad waajib ma ahan.
<b>MN DREAM Act</b>	<b>MN DREAM Act</b>	MN DREAM Act wuxuu faa'iido u yahay ardayda aan sharciga laheyn ee ku sugan Minnesota ee buuxiyo shuruud gaar ah
<b>Net Price Calculator</b>	<b>Xisaabiyyaha Qiimaha Saafiga Ah</b>	Foomka onlaynka ah ee ardaydu galiyaan maclumaadka ku saabsan iyo/ama dhaqaalahaa qoyskooda si ay u helaan qiasta inta uu le'eg yahay kaalmada dhaqaale ee la siin karo
<b>Next Steps</b>	<b>Tallaabooyinka Xiga</b>	Waxqabadyada ardaygu sameeyo kadib diiwaangelinta
<b>Orientation</b>	<b>Jaheynta</b>	Barnaamij xagaa oo waajib ah oo ardayda u soo bandhigaya dhigaalada iyo fursadaha ka jira U of M
<b>Priority Deadline</b>	<b>Waqtiga Kamadambeysta ah ee Mudnaanta Leh</b>	Waqtiga kamadambeysta ah ee la buuxiyo FAFSA si loo hubiyo in ogeysiinta aysan dib u dhicin
<b>Prospective Student</b>	<b>Ardayga La Filayo</b>	Arday xiiseynaya inuu dhigto kulliyad
<b>Reciprocity</b>	<b>Isweydaaris</b>	Ardayda dhigata U of M ee ka yimid Wisconsin, North Dakota, South Dakota iyo Manitoba, Canada. Ardaydaani waxay xaq u leeyihiin lacagta waxbarasho ee gobolka haddii ay codsadaan isweydaaris arday.
<b>Regular Deadline</b>	<b>Waqtiga Kamadambeysta ah ee Caadiga ah</b>	Waqtiga kamadambeysta ah ee ugu dambeeya ee arjiyada
<b>Rescind</b>	<b>Ka Noqo</b>	Xulasho kulliyadu sameyso si ay u baajiso diiwaangelin arday
<b>Residence Hall</b>	<b>Hoolka La Deggo</b>	Guryaha ardaydu seexato ama guryaha kale ee lagu noolaado ee ay kulliyada bixiso
<b>Resident</b>	<b>Deggane</b>	Qofka ku nool Minnesota
<b>Room and Board</b>	<b>Qolka iyo Cuntada</b>	Lacag kulliyadu ku dallacdo ku noolaanshaha iyo ku cunteynta hoolka la deggo
<b>Self-Reported Academic Record</b>	<b>Diiwaanka Tacliin ee La Soo Weriyo</b>	U of M waxay ardayda ka dooneysaa inay uga warbixiyaan natijjooyinka imtixaankooda iyo dhibcaha dugsiga sare gudaha arjigooda - taasoo macnaheedu yahay inaysan u baahnay inay keenaan dukumiintyo rasmii ah ilaa iyo inta laga diiwaangelinayo. <b>Fadlan ogow:</b> Dhibcaha imtixaanada ACT/SAT looma baahna in lagu qoro arjiga 2021.
<b>Standardized Test</b>	<b>Imtixaan La Jaangooyay</b>	Imtixaan cabbira fahamka ardayga ee mawduuca iyo u-diyaarsanaanta waxbarasho ee casharrada heerka jaamacadeed
<b>Tuition</b>	<b>Lacagta Waxbarashada</b>	Lacag kulliyada ku dallacdo casharrada iyo isticmaalka dhigaalada laga helo dhismaha jaamacadda. Caddada ardaygu bixiyo waxay ku xiran tahay kaalmada dhaqaale iyo xaaladooda joogitaanka gobolka ama ka baxsanaanta gobolka.
<b>U of M</b>	<b>U of M</b>	Magaca la soo gaabiyay ee Jaamacadda Minnesota Twin Cities
<b>Virtual Campus Tours</b>	<b>Booqashooyinka Fog ee Dhismaha Jaamacadda</b>	Ikhtiyaar onlays ah oo loogu talagalay in ardayda ay arkaan dhismaha jaamacadda iyagoon shaqsiyan booqan dugsiga
<b>Waitlist</b>	<b>Liiska Sugida</b>	Kulliyada ayaa ku meeleysay arday liiska ardayda kale ee u-qalanta diiwaangelin balse wali lama diiwaangelin sabab la xiriirta boosaska oo xaddidan
<b>Waive</b>	<b>Ka Dhaafid</b>	Shayga ama dukumiintiga aan loo baahneyn in lagu daro arjiga si loogu tixgeliyo inuu yahay mid dhammaystiran

